

Aadista goobta qaadista saamiga baaritaanka

Haddii aad la dhibbantahay calaamadaha caabuqa habdhiska neef-mareenka, ka qabso wakhtiga baaritaana fayruska Koronaha adeegga omaolo.fi. Ha aadin daryeelka adigoo aan la xiriiirin adeegga omaolo.fi ama lambarka Heeganka caawimaadda 116117.

Hala samayn xiriir taabasho ah dadka ka baxsan kuwa aad meel kula nooshahay kahor inta aad ka heleyso naatijada baaritaanka oo negatíf ah. Isticmaal af-shareer marka aad tegayso goobta qaadista saamiga baaritaanka, ku dadaal nadaafadda gacmahaada dadka kalana u jirso masaafada ammaanka oo 2 mitir ah.

Ugu horreyn ku imow goobta qaadista saamiga baaritaanka baabuurkaada, baaskiil ama socod, si aad isaga ilaaliso xiriirka dhow ee dadka kale. Waxaa kale oo suuraggal ah in goobta qaadista saamiga lagu yimaado tagsi ama baabuur uu qof kuu dhow kugu soo qaadayo. Marka aad tagsiga dalbanayso, codso tagsiga ay ku rakibantahay muraayadda dhowrta dhibcaha qoyaanka ah. Waxaa kale oo aad tagsiga dhexdiisa ku isticmaashaa af-shareer. Waa in si aad ah looga fiirsado isticmaalka gaadiidka dadweynaha, haddii tuhun xooggan laga qabo Koronana, ma ahan in marnaba gaadiidkaas la isticmaalo.

Haddii bukaan caafimaadkiisu liito aanu wax gaadiid ah ku tegi karin goobta qaadista saamiga, Heeganka caawimaadda 116117 ayaa qiimaynaya suuraggalnimada in isbitaal-gurigu uu bukaanka uga soo qaadi karo gurigiisa saamiga baaritaanka fayruska Koronaha. Haddii calaamadaha cudurku ay yihiin kuwa nafta halis ku ah, waxaa markasta la wacayaa lambarka gurmada degdegga ah ee 112.